

Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Sibteembar 2023 ayaa gaaray 142.65, marka la barbardhigo 142.58 bishii Agoosto 2023.

Isbedel bileedka, Sibteembar 2023, marka la barbar dhigo Agoosto 2023, ayuu sare u kacaa 0.05, boqolkiiba sare u kaca ugu badan ayaa ahaa qiimaha **Isgaarsiinta** 17.49 boqolkiiba iyo **Caafimaadka** 2.58 boqolkiiba. Sare kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Isgaarsiinka taas oo ay sababtay qiima koror ku yimid agabka Teelofonka iyo Telefax +22.79 boqolkiiba. Sare ugu badan ayaa ka yimid caafimaadka gaar ahaan agabka Farmashiga +7.85 boqolkiiba (Jaantuska 2)

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Sibteembar 2022 iyo Sibteembar 2023 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 5.44 boqolkiiba, marka la barbardhigo 5.82 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Agoosto 2022 iyo Agoosto 2023.

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Sibteembar 2023 (Dec 2014 = 100)


| Tusaha Sicirka Badeecadaha, Sibteembar 2023 | |
|--|--------|
| Tusaha bishan (Sibteembar 2023) | 142.65 |
| Tusaha bishii hore (Sibteembar 2023) | 142.58 |
| Tusaha sanadkii hore (Sibteembar 2022) | 135.28 |
| Isbedelka bilaha ah boqolkiiba % | 0.05% |
| Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba % | 5.44% |

Heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da

Isbedelka boqoleyda ee 12 bilood

Tixraca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Sebteembar 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Sibteembar 2023

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Sibteembar 2023

Heerka sicir-bararka bisha Sibteembar 2023 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Sibteembar 2022 iyo Sibteembar 2023.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 5.44 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Sibteembar 2022 iyo Sibteembar 2023, marka labar bardhigo 5.82 boqolkiiba 12kii bilood, Sibteembar 2022 iyo Sibteembar 2023.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ee Sibteembar 2023 ayaa sameeyey sare u kacay 0.05 boqolkiiba.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Sibteembar 2023.


Heerka sicir bararka qiimaha **cuntada iyo cabitaanada**, **guryaha**, **biyaha**, **korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi ayaa sare u kacay -1.96 boqolkiiba, bishii Sibteembar 2023 marka la barbardhigo sare u kac gaaraya -2.99 boqolkiiba bishii Agoosto 2023. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu hoos u dhaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay -4.07 boqolkiiba bishii Sibteembar 2023. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray -2.08 boqolkiiba Agoosto 2023.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa sameeyey sare u kac bille ah oo gaaraya 1.24 boqolkiiba Sibteembar 2023. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sameeyey hoos u dhac dhan 15.04 boqolkiiba Sibteembar 2022. Tan ayaa imaanaysa marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo sare u kacay 15.62 boqolkiiba ee Agoosto 2023.

Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Sebteembar 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Sibteembar 2023 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Tubaakada** ayaa la diiwaangaliyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 34.5 boqolkiib bishii Sibteembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Qaadka (Miiraha ah) (+116.67 boqolkiiba).
- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 34.5 boqolkiiba bishii Sibteembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+72.11 boqolkiiba).
- **Kirada guryaha, Korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 15.04 boqolkiiba bishii Sibteembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha kirada guryada (+16.35 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay qiimaha abaartimentiga oo gaaray (+33.33 boqolkiiba)
- **Dharka & Kabaha** ayaa lagu diwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 14.45 boqolkiiba Sibteembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+16.52 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka Raga oo qiimihiisu gaaray (+33.07 boqolkiiba).
- **Cafimaadka** ayaa lagu diiwaan geliyey sare u kac sanadle ah 13.42 boqolkiiba, bishii Sibteembar 2023. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Agabka Caafimaadka (+29.22 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 10.55 boqolkiiba bishii Sibteembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Adeega Gaadiidka (+32.36 boqolkiiba). Sare u kaca waxaa ka yimid qiimaha gaadiidka dad weynaha (+49.21 boqolkiiba)
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 9.30 boqolkiiba Sibteembar 2023. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+10.42 boqolkiiba).

- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 7.38 boqolkiiba Sibteembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dhalada, Maacuunta & Agabka miisaska (+13.79 boqolkiiba).
- **Tacliinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 7.18 boqolkiiba Sibteembar 2023. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha lagu dhigto dugsiga sare oo u gaaray (+28.26 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle 3.60 boqolkiiba bishii Sibteembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid hoteelada (+5.70 boqolkiiba).


Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Sibteembar 2023 (-)

- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda sanadlaha ahi ayaa hoos u dhacay -4.07 boqolkiiba, bishii Sibteembar 2023. Hoos u dhaca ugu badan waxaa sababay cuntada oo qiimahoodu gaaray (-4.22 boqolkiiba) Sababta oo ah hoos u dhac ku yimid qiimaha saliida iyo dufanka (-35.75 boqolkiiba).

B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya qeybaha kala duwan ee TSB -da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Sibteembar 2023

(Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Sibteembar 2023 (+)

- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac bille ah 17.49 boqolkiiba bishii Sibteembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+22.79 boqolkiiba).
- **Cafimaadka** ayaa lagu diwaan geliyey sare u kac bille ah ah 2.58 boqolkiiba, bishii Sibteembar 2023. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Agabka Caafimaadka (+7.85 boqolkiiba).

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bisha Sibteembar 2023 (-)

- Guud haan majirin hoos u dhac la taaban karo bishii Sibteembar .

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Sibteembar 2023 ee habka (COICOP)

| Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP | TSB Weight | Sibteembar 2022 TSB | Agoosto 2023 TSB | Sibteembar 2023 TSB | % Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore | % Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan |
|---|------------|---------------------|------------------|---------------------|--------------------------------------|--|
| Dhamaan Qeybaha Tsb | 100.00 | 135.28 | 142.58 | 142.65 | 0.05 | 5.44 |
| CUNTADA & CABITAANADA | 46.04 | 148.80 | 145.60 | 142.75 | -1.96 | -4.07 |
| TUBAAKADDA | 1.25 | 90.93 | 167.33 | 167.33 | 0.00 | 84.03 |
| DHARKA & KABAHA | 5.03 | 148.08 | 168.72 | 169.47 | 0.45 | 14.45 |
| GURYAHA, BIYAHA, KORONTADA, GAASKA & SHIDAALKA KALE | 23.41 | 122.28 | 138.95 | 140.67 | 1.24 | 15.04 |
| AGABKA GURYAHA | 2.93 | 109.53 | 116.56 | 117.61 | 0.90 | 7.38 |
| CAAFIMAADKA | 5.00 | 161.16 | 178.18 | 182.78 | 2.58 | 13.42 |
| GAADIIDKA | 3.77 | 109.72 | 121.29 | 121.29 | 0.00 | 10.55 |
| ISGAARSIINTA | 2.80 | 103.03 | 129.05 | 151.63 | 17.49 | 47.16 |
| HAWO BEDELESHADA & DHAQANKA | 1.00 | 103.85 | 104.30 | 104.30 | 0.00 | 0.43 |
| TACLIINTA | 4.00 | 109.11 | 116.95 | 116.95 | 0.00 | 7.18 |
| MAQAAYADAHADA & HOTEELADA | 2.00 | 140.72 | 145.78 | 145.78 | 0.00 | 3.60 |
| ALAABAHA YARYAR & ADEEGYADA | 2.77 | 110.27 | 118.80 | 120.52 | 1.45 | 9.30 |

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.

Soosaarida tan xigta


Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Octoobar, 2023 waxaa la baahin doonaa 15 Nofeembar, 2023. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

War bixin bileedka bisha **Sebteembar 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Sibteembar 2023 marka loo eego COICOPka

Dhamaan qeybaha TS-da

Qeybaha ka qeybqata (%) heerka sicir baarka (COICOP)



Ishaxogta: NBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bishsa oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **Sebteembar 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia